

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sharci 15 Febraayo 1961, Lr.8

Wax ka-beddelka sharciga ku – shaqeynta xirfadda notaayenimo gudaha Soomaaliya.

MADAXWEYNAHA KU MEEL GAARKA EE JAMHUURIYADDA

Markuu Arkay ansixinta Golaha Shacabka;

WUXUU SAXIIXAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Sí loo helo magacaabidda notaayaha waxaa lagama maarmaan ah:

- 1) in uu qofku yahay muwaadin Soomaaliyeed;
- 2) in uu buuxiyey ugu yaraan dá 25 sano;
- 3) in uu leeyahay habdhaqan ilbaxnimo iyo anshax oo dhan kasta oo loo eego aan faafreeb lahayn;
- 4) in uu haysto shahaado jaamacadeed ee xagga sharciga ama dibloom uu ka qaatay Machadka – Jaamacadeed ee Sharciga iyo Dhaqaalaha ama shahaado u dhiganta;
- 5) in uu ku qoran yahay diiwaanka notaayaasha tababarka ku jira ama uu sameeyey tababar notaayenimo, ugu yaraan lix bilood.

Qod. 2

Tirada iyo degaanka notaayaasha waxaa lagu goynayaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Garsoorka iyo Caddaaladda, asaga oo dhegeystay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeerilaaliyaha Guud ee Qaranka, asaga oo tixgelinaya dadka deggan iyo tirada hawlqabaka, baaxadda dhulka iyo qalabka isgaarsiinta.

Qod. 3

Magacaabidda notaayaha waxaa lagu sameynayaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Garsoorka iyo Caddaaladda, tartan ka dib.

Qod. 4

Tartamada loo galo magacaabidda notaaye waxaa lagu soo bandhigaa Xeer uu soo saaro Wasiirka Garsoorka iyo Caddaaladda.

Qod. 5

Waxba lagama beddelin xagga wixii kusaabsan qabashada hawlaha notaayo ee macaamilooyinka dhexmara dadka muslimiinta ah, ee ku saleysan axkaamta Shareecada Islaamka, sida uu dhigato qodobka 111 ee Nidaamka Garsoorka.

Qod. 6

Muwaandin kasta ee Soomaaliyeed oo xirfad notaaye guud, oo midowga ka hor, kaga shaqayn jiray gobol ka mida gobollada Jamhuuriyadda, waxa uu u idman yahay in uu xirfaddaas kaga hawlgalo meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda.

Qod. 7

Xukuumaddu waxa ay u idman tahay in ay soo saarto wixii xeernidaamiye ah ee loogu baahdo hirgelinta Sharcigan.

Qod. 8

Waxaa la baabiyey dhammaan wixii axkaam sharci ah ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 9

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa isla marka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah. Sharcigan waxaa lagu darayaa Ururinta Rasmiga ee Sharciyada waxaana lagu shaacinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta waxaa waajib ku ah in ay dhowrto, waana in loo dhowraa in uu yahay sharciga Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Febraayo 1961.

Aadan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad
CABI-RASHIID CALI SHARMAAKE

Wasiirka Garsoorka iyo Caddaaladda
MAXAMUUD AHMED MAXAMED